

# MABAADI'I'DA SIYAASADA XISBIGA



XISBIGA QARANSOOR

---

## **WAA DIB U HABEYN SIYAASADEED OO CUSUB**

---

### **HOGGAAN HUFAN & QARANNIMO SOOMAALIYEED**

---

### **WAA DHAQDHAQAAQA DANAHA UMMADA SOOMAALIYEED**

---

#### **1. Nidaam Waxbarasho aan Horey Loo Arag**

"Dhisida nidaam waxbarasho oo ku dhisan illaalinta caqlaaqda, diinta Islaamka, teknollijiyyada, soo saarista xirfadleyaal iyo illaalinta taariikhda ummada Soomaaliyeed."

#### **2. Dhisida Awood Militari & Haayad Sirdoon oo Tayo fiican leh**

"U hawlgelida sidii loo dhisid lahaa awood ciidan iyo haayad sirdoon qaran oo tayo fiican leh, kuwasoo illaalin kara xaquuqda muwaadiniinta, dastuurka dalka iyo madax banaanida qaranka."

#### **3. Qodista Shidaalka Dalkeena**

"Qodista shidaalka waxay horseed u tahay dhisida nidaam waxbarasho oo tayo leh, aanan kaalmo loo weydiisanin dalal shisheeye ama haayado shisheeye iyo dhisida awooda militari"

#### **4. Caddaalada & Garsoorka**

"Caddaalad in la dhiso oo lagu dhaqmo waa mid ka mid ah asbaabaha ay u taagan tahay Xisbiga Qaransoor, haddiise la waayo waxaa la waayi Madaxda iyo Dowladnimada sidii loo waayay Dowladnimadii Soomaaliya. - Cadaalada waa doorka Nabada iyo Dib u heshiisiinta bulshada."

#### **5. Dhisida Nidaam Dhaqaale**

"Dhisida nidaam dhaqaale oo ku dhisan Illaalinta xaqquuqal insaanka, rag iyo dumarba la siiyo fursado loo siman yahay, la hubiyo in dhammaan takoorista noocyadooda kala duwan ay dabar go'een si kor loogu qaado dhaqaalahaa dalka iyo si cid walbo uga qeyb galaan horumarka dalka."

PHOTO BY MARTIN R. SMITH

#### **6. Horumarinta Caafimaadka Bulshada**

Hooyo walbo oo Soomaaliyeed waxay xaq u yeelanaysaa inay hesho goob caafimaad oo ay ku dhasho oo lacag la'aan ah. - Waa qorshaha nidaamka iyo meelmarinta Siyaasadda caafimaadka ee siyaasada Xisbiga Qaransoor.

#### **7. In magaca Madaxweyne Maamul Hebel La Bedelo**

"Dhacdooyinkii soo maray dalka waxaa laga baran karaa in maamulada qaar aysan isu arkin inay yihiin qeyb ka tirsan Soomaaliya ee ay isu arkeen inay yihiin dowlad ka madax banaan Soomaaliya, waxayna keentay kala fogaansho xagga bulshada dhexdeeda ah."

#### **8. Dabar-goynta Qaadka, Daroogada & Hashiiska**

"Qabiilka waa midka dumiyey qarankii Soomaaliyeed, hadaba mala socotaa in qaadkuna yahay mataankiisa, kaas oo qallajiyey dhaqankii, dhaqaalihii iyo dheecaankii dadka Soomaaliyeed?

#### **9. Shaqo Abuurista iyo Badbaadinta Nolosha Bulshada**

"Badbaadinta nolosha bulshada, joojinta tahriibka dhalinyarada iyo xagjirnimada waxaa loogu hortagi karaa shaqo abuuris ku dhisan caddaalad. "Bartilmameedka saxda ah ee siyaasada shaqada waa shaqo helis sareyso iyo shaqo la'aan hooseysa."

## **10. Abuurista Tartan Ganacsi iyo Fursad Siinta Hal-abuurayaasha**

“Siyasada Xisbiga Qaransoor ee ku dhisan fursad siinta hal abuurayaasha ganacsatada waxay horseed u tahay shaqo abuurista muwaadiniinta iyo xoojinta dhaqaalaha dalka. Sidaas awgeed, tartanka ganacsiga wuxuu xoojiyaa dareenka hal-abuurayaasha, wuxuuna abuuraa dhaqaallo iyo isbedel.”

## **11. Mamnuucista Shacab Hub-qaadashada**

“U hawlgelida siddii guud ahaan dalka loogu mamnuuci lahaa shacab hub qaadashada, si ummada Soomaaliyeed markale loogu illaaliyo dagaal sokeeye.”

## **12. La Xisaabtanka Haayadaha NGO-yada iyo Kuwa Lamidka ah**

PHOTO BY MARTIN R. SMITH

“Caalam ahaan NGO-yada, waa kuwa laga warhaayo, Soomaali badana way ku baraarugsan tahay laakiin inta badan waxa laga raacaa masaalixda gaarka ah ama inaan waxba laga qaban karin, madamaa uusan jirin qaran xoog leh.”  
- Wax waa laga qaban karaa.

# **HIIGSIGA**

*Xisbiga Qaransoor*

U hawlgelida sidii loo heli lahaa qaran awood u leh isku filnaansho dhaqaale iyo mid amni, horumarinta laamaha sirdoonka iyo militariga, la dagaalanka xagjirnimada, dhisida nidaam waxbarasho oo ku dhisan tayo aqooneed iyo mid diineed.